

# Ka-dhaafka Awooda Daryeelka Caruurta ee Guriga Qoyska 13+ Su'aalaha Badanaa La Isweydiyo



## Waa maxay Kadhaafista Awooda Daryeelka Caruurta ee Guriga Qoyska?

Sharciga Gobolka Washington, RCW 43.216.692, ayaa u oggolaanaya bixiyaha daryeelka carruurta ee guriga qoyska inuu daryeelo in kabadan 12 carruur ah oo haysta kadhaafista DCYF oo la aqbalay oo buuxineyso shuruudaha lagu dajiyey WAC 110-300-0358.

## Wadarta Guud ee Awooda La Codsaday

Wadarta tirada guud ee carruurta aad rabi lahayd inaad halmar kuhayso daryeelka.

## Da'da Carruurta

Kusoo dar da'da canuga ugu yar ilaa da'da canuga ugu weyn ee aad u oggolaaneyso daryeelka (kaliya ma ahan kuwa hadda aad kuhayso goobta daryeelka).

## Carruurta Kayar Da'da Labo Sano

Wadarta tirada guud ee carruurta aad rabi lahayd inaad diiwaangeliso oo kayar da'da labo sano. Hase yeeshee, kadhaafistan waxaa lagu xadiday waxaan ka badneyn lix carruur ah oo kayar da'da labo sano.

## Khibrada Loo Baahan Yahay

Waa inaad haysataa ugu yaraan saddex sano oo bixiyaha shatiga haysta ee daryeelka carruurta ee guriga qoyska, agaasime xarun, kormeere barnaamij, hogaan macalin, ama door lamid ah.

## Waxbarashada/Tababarka Loo Baahan Yahay

Si aad ugu qalanto, waa inaad haysataa Shahaadada Gaaban ee Gobolka Washington ama Wax Udhigma oo ay xaqiijisay MERIT. Waa inaad haysataa qof labaad oo ay tahay inuu haysto Shahaadada Bilowga ah ama Gaaban ama wax udhigma oo ay xaqiijisay MERIT.

## Goobta Gudaha ah ee Loo Baahan Yahay

- 35 fiit oo isku wareeg ah canugiiba ayaa loo baahan yahay (iyadoo aanan loo eegeynin da'da) oo goobtuna waa inay ahaataa goob horay shatiga daryeelka carruurta kahaysata DCYF.
- Intaa waxaa dheer, canug kasta oo kayar da'da labo sano awood ahaan, waa inaad u haysaa 15 fiit oo isku wareeg ah oo ah goob horay shatiga daryeelka carruurta kahaysata DCYF.
- Shaqaalaha shatiga kahaysta daryeelka carruurta ayaa laga yaabaa inay cabiraan si loo hubiyo in boosku ku filan yahay.

## Goobta Dibedda ah ee Loo Baahan Yahay

- 75 fiit oo isku wareeg ah canugiiba ayaa loo baahan yahay (iyadoo aanan loo eegeynin da'da) oo goobtuna waa inay ahaataa goob horay shatiga daryeelka carruurta kahaysata DCYF.
- Haddii aadan lahayn booski dibedda ahaa ee loo baahnaa, waa inaad soo gudbisaa qorshe qoraal ah oo kusaabsan sida aad isugu kala wareejin doonto *qeybta Qorshaha Shaqaaleynta iyo Isticmaalka Goobta*.
- Haddii aadan lahayn goob dibedda kutaala oo lagu ciyaaro, oo aadna heshay oggolaansho aad carruurta ugu kaxeeyso meel kabaxsan goobta ee waqtiga loo kaxeynayo bannaanka, waxaad ubaahnaa doontaa inaad soo gudbiso qorshe oggolaansho si loo hubiyo caafimaadka iyo badqabka tirada carruurta ee aad codsaneyso.

## Musqulaha iyo Tuubooyinka Leh Beeshinada Biyaha Wasakhda ay Kasii Dhexbaxaan ee Loo Baahan yahay

Waa inay jirtaa hal musqul iyo tuubada leh beeshinka biyaha wasakhda ah ay kasii dhexbaxaan musqul kasta oo ay isticmaalaan 15 qof. Tani waxaa kujira dhammaan xubnaha katirsan qoyska, shaqaalaha, iyo carruurta kusugan goobta. Shaqaalaha iyo xubnaha katirsan qoyska ayaa gali kara musqulaha iyo tuubooyinka leh beeshinada biyaha wasakhda ay kasii dhexbaxaan ee goobta aan shatiga haysan laakiin carruurta daryeelka ilmaha magali karaan. DCYF waxay kaaga baahan doontaa inay ogaato meesha musqulaha dheeraadka ah iyo tuubooyinka leh beeshinada biyaha wasakhda ay kasii dhexbaxaan ay kuyaalaan iyo qorshahaaga aad kudabooleyso baahiyaha shaqaalahaaga. Fadlan soo gudbi qorshe qoran oo kusaabsan sida aad u maareyn doonto musqulaha iyo tuubooyinka leh beeshinada biyaha wasakhda ay kasii dhexbaxaan ee *qeybta Qorshaha Shaqaaleynta iyo Isticmaalka Goobta*.



Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**

## Cadeynta Nidaamka Sifeynta Biyaha Bullaacada

Haddii xarunta daryeelka carruurta ay sifeyso biyaha bullaacada, cadeyn kasocoto caafimaadka dadweynaha ama kormeere kale oo qaabilsan nidaamka sifeynta biyaha bullaacada oo uqalma ayaa loo baahan yahay oo muujineyso in nidaamkaagu xamili karo tirada guud ee dadka oo ay kujiraan xubnaha katirsan qoyska, shaqaalaha, iyo awooda carruurta.

## Shuruudaha Barnaamijka

Bixiyaha daryeelka carruurta ee qoyska guriga waa inuu keenaa sheeyaasha kufulan si loogu daboolo baahiyaha canug kasta oo ka diiwaan gashan barnaamijka:

- Qaanadaha/goobta keydinta gaarka ah
- Darimaha/sariiraha jifka
- Sariiraha ilmaha/sariiraha yaryarka ee ilmuhu kuciyaaraan
- Miisaska leh fadhiga
- Baanbolo
- Ciyaaro lagu ciyaaro
- Agabyada waxbarashada
- Qalabka bannaanka loogu talagalay
- Waxyaabaha kale ee lagu sheegay WAC 110-300

## Udiyaargarowga Xaalada Degdega

Qorshahaaga udiyaarsanaanta xaaladaha degdega ah ayaa ubaahan casriyeyn si uu u qaado tirada isbadbadaleysa ee carruurta joogta goobta daryeelka. Haddii dib u eegis lagu sameeyo, fadlan usoo dir shaqaalaha shati bixinta goobta daryeelka carruurta qorshaha la cusbooneysiisay.

## Qorshaha Shaqaaleynta iyo Isticmaalka Goobta

Qeybtan dhexdeeda, waxaad ku faahfaahin kartaa sheeyaasha ubaahan cadeyn ama oggolaansho dheeraad ah, sida musqulaha iyo tuubooyinka leh beeshinada biyaha wasakhda ay kasii dhexbaxaan, ciyaarta dibedda ah, iwm.

### Yaan la xiriiraa haddii aan su'aalo qabo?

Fadlan la xariir Child Care Licensing Office (Xafiiskaaga Shatiga Daryeelka Carruurta) ee maxalliga ah ama Bixiyaha Shatiga Daryeelka Carruurta.

## Lifaaqyo muhiim ah

RCW 43.216.692: <https://app.leg.wa.gov/rcw/default.aspx?cite=43.216.692#:~:text=The%20department%20may%20waive%20the,not%20more%20than%202012%20children.>

WAC 110-300-0358: <https://app.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-300-0358>

Shahaado Kooban ama Wax-u-dhigma: <https://www.dcyf.wa.gov/services/early-learning-providers/qualifications/child-care-providers>

MERIT: <https://apps.dcyf.wa.gov/MERIT>

WAC 110-300: <https://app.leg.wa.gov/wac/default.aspx?cite=110-300>

Qorshaha Udiyaarsanaanta Xaaladaha Degdega ah: <https://app.leg.wa.gov/WAC/default.aspx?cite=110-300-0470>

Xafiiska Shati Bixinta Daryeelka Carruurta: <https://dcyf.wa.gov/find-an-office/el-offices>

## JAANTUSKA AWOODA BARNAAMIYADA WAXBARASHADA BARBAARINTA GURIGA QOYSKA 13+ KA-DHAAFKA AWOODA

Tixraaca WAC 110-300-0358

Da'da/Kooxda	Saamiga ugu Badan	Kooxda Tamar-badan	Caruurta ka Yar 2 Sano
2-12 sano	1:8 Marka ay ku jiraan 13 caruura ama in ka badan daryeel, waxa jiri doona ugu yaraan labo shaqaale ah (oo ay ku jiraan kuwa liisanka haysta)	Da'daha isku jira ee 2 sano ilaa 12 sano	Caruur aan ka yaren 2 sano
Dhalashada-12 sano	1:6 Marka ay ku jiraan 13 caruura ama in ka badan daryeel, waxa jiri doona ugu yaraan saddex shaqaale ah (oo ay ku jiraan kuwa liisanka haysta)	Ugu yaraan labo caruura oo ka yar labo sano ayaa u socon kara si madax banaan	6
		Ugu yaraan hal cunug oo ka yar labo sano ayaa u socon kara si madax banaan	5
		Marka aanay caruurta ka yar labo sano u socon karin si madaxbanaan	4

DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnaamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, dhalashada, rabitaanka galmo, da'da, xaalad ciidan ama jiritaanka naafo jidheed, dareen ama maskaxeed.

Haddii aad tahay qof naafo ah oo ka walaacsan xuquuqdaada laguugu siiyey Americans with Disabilities Act (Xeerka Ameerikaanka Naafada ah), fadlan ka eeg daabacaada Public Notice of Nondiscrimination (Ogeysiiska Dadweynaha ee Takoora La'aanta) (HR\_0012) wixi macluumaad dheeraad ah iyo tilmaamaha kusaabsan sida cabasho loogu gudbiyo onlaynka halkan [www.dcyf.wa.gov/publications-library/HR\\_0012](http://www.dcyf.wa.gov/publications-library/HR_0012).

Haddii aad rabto nuqullo dukumeenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiidh DCYF Constituent Relations (Xidhiidhada Qaybaha)

1-800-723-4831 ama iimaylka [communications@dcyf.wa.gov](mailto:communications@dcyf.wa.gov).

DCYF PUBLICATION LIC\_0063 SM (11-2022) Somali